



Noloshaada. Baahiyahaaga. Gunnooyinkaaga.



myRewards | Hagaha nolosha.

Gunnooyinka • Badqabka • Aqoonsiga • Magdhowga • Hawlgabka

Waxaa soo dhowaaday wakhtigii aad dooran lahayd gunnooyinkaaga 2027

Rich's waxay bixisaa gunnooyin loogu talagalay inay daboolaan baahiyahaaga xaalad walboo aad ku sugan tahay—iyadoo ku siinaysa xulashooyin aad kala dooran karto iyadoo lagu salaynayo waxa adiga iyo qoyskaaga idiin muhiim ah.



Maxaa ku cusub 2027

Halkaan waxaa ku yaala waxyaabaha cusub iyo waxyaabaha aad u baahan tahay inaad ogaato marka aad sahminayso gunnooyinka iyo marka aad samaynayso xulashooyinkaaga.

-  **Gunnooyinka adiga lagu tixgeliyey.** Waxaan hagaajinaynaa qorshayaasheena caafimaadka si ay si wanaagsan ula jaanqaadaan suuqa, iyadoo la xaddidayo kororka lacagaha aad ku darsanayso. Qorshayaasha caymiska ilkaha iyo aragga—iyo kharashaadkooda—sidoodii ayay ahaan doonaan.
-  **Waxaan soo bandhigaynaa bixiyaha cusub ee adeegyada caafimaadka ee marxaladaha kala duwan ee nolosha.** Waxaan bilaabaynaa gunnooyin cusub oo la xoojiyey oo ay bixiso Carrot, kuwaas oo taageeraya marxalad kasta oo nolosha ka mid ah, oo ay ka mid yihiin bacriminta, korsashada, daryeelka qoyska, barbaarinta carruurta, daryeelka carruurta, joogsiga caadada, caafimaadka ragga iyo in kale oo badan.
-  **Cusboonaysiinno muhiim ah oo lagu samaynayo caymiska GLP-1.** Waxaan samaynaynaa isbeddello gacan loogu gaysanayo in caymiskan sii ahaado mid la heli karo, oo ka mid yihiin shuruudo cusub oo lagu bixinayo oggolaansho hore iyo wax-ka-beddel lagu sameeyay qaybta kharashka wadaagga ah. Macaamiisha ay arrintani saamaysay waxay faahfaahinta si toos ah boostada uga heli doonaan Evernorth (oo hore loo yaqaanay ESI).
-  **Xulashooyin badan oo caymiska nolosha ah—iyo kayd dheeraad ah.** Caymiska nolosha ee dheeraadka ah ayaa hadda la heli doonaa ilaa \$2 milyan, iyadoo kharashka caymiska uu hoos u dhacayo, waxaana sidoo kale jiri doona xulashooyin dheeraad ah oo ku saabsan caymiska nolosha ee dadka kugu tiirsan.
-  **Maalgelin ku samaynta waxa ugu muhiimsan.** Waxaan si joogto ah u qiimaynaynaa meelaha ay gunnooyinkeena saamaynta ugu weyn ku yeelan karaan. Iyadoo qayb ka ah isbeddelladan, waxaan joojin doonnaa iskaashiyadii aan lahayn 2nd.MD iyo Care@Work marka la gaaro dhammaadka sannadka 2026, waxaana kheyraadkii halkaas loo qoondeeyay dib loogu maalgelinayaa isbeddellada qorshayaasha sannadkan.
-  **Xoojinta waayo-aragnimada Collective Health.** Collective Health waxay kordhinaysaa tababarka, taageerada iyo kheyraadka si ay gacan uga gaysato in su'aalaha/dhibaatooyinka si dhakhso ah loo xalliyo, isla markaana ay qof kasta oo macaamiil ka ah Rich's ugu abuurto waayo-aragnimo si gaar ah ugu habboon baahidiisa.

Kheyraad muhiim ah

Sahmi xulashooyinkaaga

Booqo websaydkeena ee gunnooyinka la cusboonaysiiyay, **MyRichsBenefits.com**, ka hor inta aysan bilaaban Muddada Isdiiwaangelinta Furan, si aad isugu barbar dhigto qorshayaasha, u sahmis kheyraadka adeeg-bixiyeyaasha, una hesho macluumaadka aad u baahan tahay si aad go'aanno xog-ogaal aad u tahay u gaarto.



Iskaan gareey si aad u booqato **MyRichsBenefits.com**

Ogow ka hor intaadan isdiiwaangelin

Laga bilaabo Oktoobar 9, booqo bogagga hordhaca ah ee Collective Health iyo Express Scripts ee Evernorth si aad u sahmis dawooyinka caymiska uu daboolayo iyo kharashaadkooda, si aad u hesho adeegbixiyeyaasha caafimaad ee ku jira shabakadda, si aad u eegto faahfaahinta qorshayaasha iyo in kale oo badan. Iskaan gareey koodhahka QR ee hoose si aad u bilowdo.



Iskaan gareey si aad u booqato bogga hordhaca ah ee Collective Health



Iskaan gareey si aad u booqato bogga hordhaca ah ee Express Scripts ee Evernorth

Ma u baahan tahay caawimaad?

Collective Health waxay leedahay koox khubaro ah oo diyaar u ah inay ka jawaabaan su'aalahaaga ku saabsan caafimaadka iyo farmashiyaha. Waxaad la xiriiri kartaa Health Collective adiga oo wacaya: **1-855-242-5559**.


Macaamiisha uu daboolo heshiiska gorgortanka wadajirka ah (CBA) waa inay tixraacaan heshiiskooda si ay u helaan faahfaahinta gaarka ah ee qorshahooda.

Diyaar garow

Isdiiwaangelinta Furan waxay bilaabanaysaa Isniinta, Oktoobar 26 waxayna dhammaanaysaa Jimcaha, Nofeembar 6.

Iska diiwaangeli khadka/onlayn

Laga bilaabo Oktoobar 26, waxaad is-diiwaangelin kartaa adiga oo isticmaalaya kombuyuutar ama aaladda mobaylka adigoo isticmaalaya barta Alight. Iskaan gareey QR koodhkan si aad dhakhso ugu gasho:



Iskaan gareey si aad u booqato barta Alight



Ablikeeshinka barta Alight kala soo deg Apple App Store



Ablikeeshinka barta Alight kala soo deg Google Play

Isku diiwaangeli taleefanka

Inta lagu jiro Diiwaangelinta Furan, waxaad la hadli kartaa Wakiilka Daryeelka Macaamiisha ee Alight. Waxay kaa caawin karaan tarjumaadda, waxay kuu diiwaangelin karaan gunnooyinka iyadoo la isticmaalayo taleefan, waxayna kaaga jawaabi karaan su'aalo kasta oo aad qabto.

Qabso ballan wakhti adiga kuugu fiican

Wac: **1-800-455-2587**, xulashada 1, Isniin ilaa Jimco, 8 am - 9 pm ET.

Muhiim ah:

Ma jirto diiwaangelin si otomaatig ah u gudbaysa—haddii aadan is-diiwaangelin sannadkan, ma heli doontid caymiska Rich ee sanadka 2027.

